



Soo ururi macluumaadkan

- ✓ Dhukumenti caddeyn u ah da'da (shahaado dhalasho, baasaboor ama dhukumenti lamid ah)
- ✓ 2 dhukumenti oo xaqijin u ah cinwaanka. Tusaalayaasha waxa kamid ah heshiisyada amaahda guryaha, heshiiska kirada, biilasha adeegyada guriga (taas oo ku taariikhaysan 30 ka maalmood ee ugu dambeeyaa wakhtiga isqorista), caymiska ama bayaanka kaalmada dawladda.
 - Magaca dawladda, cinwaanka guriga iyo taariikhdu waa inay muuqdaan
 - haddii aanad bixin karayn laba caddeymood oo cinwaanka ah, la xidhiidh Xarunta Qorista iyo Gudbinta
- ✓ Diiwaanada tallaalka
 - Dhammaan ardayda waa inay keenaan caddeyn taallaalada ama ka dhaafitaan caafimaad ama mid ka dhaafitaan aan caafimaad ahayn si dugsiga loo diiwaangaliyo. Si aad u aragto tallaalka fasalka loo baahan yahay, booqo shabakada Hay'ada Caafimaadka Oregon: <https://www.oregon.gov/oha/PH/PREVENTIONWELLNESS/VACCINESIMMUNIZATION/GETTINGIMMUNIZED/Pages/SchRequiredImm.aspx>.
 - Fadlan waxaad buuxisaa **Foomka Shahaadadda Tallalka(CIS)** ka dibna waxaad keentaa nuqul diiwaanka tallaalka ee ardaygaaga, ama dukementi kasta oo kale oo taageeraya in laga dhaafio xafiiska dugsiga ka hor maalinta koowaad ee dugsiga,
- ✓ Macluumaadka Baadhitaanka Caafimaadka Ilkaha iyo Aragtida (ardayda ku cusub PPS ee da'da 7 sano jirka iyo wixii ka yar)
- ✓ Macluumaadka xidhidhka xaaladda degdega ah
- ✓ Macluumaadka xidhidhka dugsigii hore (looma baahna bilawga Xanaanada)

Hanaanka isdiiwaangelinta onlaynka ah

Booqo www.pps.net/enroll. Abuur Koontada Isdiiwaangelinta ee Onlaynka ah. Ku lifaaq dukumiintiyada xaqijinta cinwaanka. Buuxi isdiiwaangelinta onlaynka ah oo guji gudbi. Xoghaynta dugsigu wuxuu la xiriiri doonaa waalidka/mas'uulka sharciga ah ee wax diiwaangalinaya si uu u ururiyo diiwaanka/foomka CIS ee tallaalka una xaqijiyo caddeyn ta da'da; sidoo kalena uu u ururiyo wixii macluumaad ah ee maqan ee lagama maarmaanka u ah dhammeystirka hanaanka qorista.

Xusuusin: Isdiiwaangelinta onlaynka ahi waxay ka diiwaangelin doontaa ardayga dugsiga loo qoondeeyay cinwaanka guriga. Si aad u xaqijiso dugsiga, booqo www.pps.net/Page/2379 oo ku qor cinwaanka Helaha Dugsiga (School Finder).

Hanaanka isdiiwaangelinta ee warqadda ah

Buuxi foomamka warqadda ah una gudbi xoghaynta dugsigaaga iyadoo ay la socdaan dhammaan dukumiintiyada loo baahanyahay.

Xirmada isdiiwaangelinta waxaa ku jira:

- ✓ Foomka isdiiwaangelinta
- ✓ Heshiiska Teknoolojiyadda
- ✓ Caddeyn ta da'da
- ✓ 2 caddeymood oo cinwaanka guriga ah
- ✓ Diiwaanka tallaalka
- ✓ Foomka Baadhista Aragga iyo Ilkaha, haddii ay khuseyso